



Federal Republic of Somalia
Galmudug State of Parliament
Office of the Speaker

Tix: XGBGM/0038/21

Tar: 31 August 2021

Ku: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug

= Dhusamareb=

Og: Madaxweyne Kuxigeenka Dawlad Gobaleedka Galmudug

= Dhusamareb=

Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare ee Dawlad Gobaleedka Galmudug

= Dhusamareeb=

Ujeedo: Soo Gudbin Shuruuc uu Ansixiyey Golaha Sharci-dejinta DGGM Mudane
Madaxweyne,

Iyada oo la tixraacayo warqadaadii sumadeedu aheyd Tix:DGG/XMKG/D0091/6/21 kuna taariikhaysneed 09/06/2021 kana timid Madaxweyne Kuxigeenka DGGM u jeed-keeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedyo ka yimid Golaha Wasiirada si Baarlamaanku uga guto Waajibkiisa Dastuuriga ah.

Golaha Sharci-dejinta DGGM ayaa ku Ansixiyey Kalfadhigiisa 2aad ee Sanadkaan 2021, Fadhiyadiisii 19, 20, 23, 25, 26 iyo 27, Shuruucda kala ah;

1. Sharciga Kalluumeysiga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:005. 30 June 2021.
2. Sharciga Nidaaminta & Naqshadeynta Magaaloooyinka Galmudug Sharci LR:006. 04 July 2021.
3. Sharciga Dakhliga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:007. 07 July 2021.
4. Sharciga Khidmadaha & Ujuurooyinka Kalluumeysiga Badda Galmudug Sharci LR:008. 11 July 2021.
5. Sharciga Shirkadaha Ganacsiga Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:009. 12 July 2021.
6. Sarciga Nootayada Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:010. 14 July 2021.

Mudane Madaxweyne adiga oo gudanaya Waajibkaaga Dastuuriga ah waxaan kusoo gudbinaynaa 6 daan Sharci ee kor ku xusan si aad ugu meel-mariso Xeer Madaxweyne, kadibna loogu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal

Guddoomiyaha

Baarlamaanka DGGM



E-mail. speaker@galmudugparliament.gov.so

Website: www.galmudugparliament.gov.so



ANSIXINTA SHARCIGA KHIDMAAHA & UJROOYINKA KALLUUMEYSIGA BADDA GALMUDUG:

MADAXWEYNAYA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG,

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 50aad farqadda 12aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug
- MARKUU ARKAY:** Qodobka 35aad Farqaddiisa 1aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoonka Baarlamaanka Galmudug Tix: XGBGM/0038/21 ee 31 August 2021 kuna saabsan ansixinta Sharciga Khidmadaha & Ujrooyinka Kalluummeysiga Badda Galmudug
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida ay Galmudug u qabto Sharcigaan

Waxa uu Madaxweynaya Dowlad Gobaleedka Galmudug soo saaray Xeerkan:

Qodobka 1aad:

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Khidmadaha & Ujrooyinka Kalluummeysiga Badda Galmudug

Qodobka 2aad:

Waxaa uu Xeerkan dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo. Laga billaabo marka la saxiixo, waxaa la baabi'yay Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Dowlad Gobaleedka Galmudug.

Mudane, Axmed Cabdi Kaariye (Qoorgoor)

Madaxweynaya Dowlad Gobaleedka Galmudug





JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG

**Sharciga Khidmadaha & Ujuurooyinka Kalluumaysiga Badda
Galmudug**

[Sharci Lr. #008]

JULY 2021

TUSMADA

CUTUBKA 1AAD	2
Qodobka 1aad. Magaca Sharciga	4
CUTUBKA 2AAD KHIDMADAHAYO UJUUROOYINKA.....	4
Qodobka 2aad. Khidmado Shati	4
Qodobka 3aad. Kharashyo iyo Kordhin (Charges) kale.....	4
Qodobka 4aad. Ujuurooyin	4
Qodobka 5aad. Dakhliga Shatiyada iyo Ruqsadaha	5
CUTUBKA 2AAD SHATIYADA IYO RUQSADAHAGAADIIDKA KALUUMAYSIGA.....	5
Qodobka 6aad. Codsiga Shatiyada Kalluumaysiga	5
Qodobka 8aad. Muddada ay Shatiyada Kalluumaysigu Ansaxay yihiin	6
Qodobka 9aad. Tirada safar Kalluumaysi ee la oggol yahay Muddada Shatigu Ansaxay yahay	6
Qodobka 10aad. Ruqsadaha Gaadiidka Taakulaynta.....	6
Qodobka 11aad. Wakiilada Gaadiidka Kalluumaysiga Qalaad iyo Kuwa la Wadaaqo	6
Qodobka 12aad. Shuruudaha Shatiyada Kalluumaysiga	6
Qodobka 13aad. Naakhuude ama Mulkiile.....	7
Qodobka 14aad. Dhaqanqalka Sharciga	7
LIFAAQYADA JADWALADA	8
Sharciga Khidmadaha lio Ujuurooyinka Kalluumaysiga	8
Jadwallada.....	Error! Bookmark not defined.
Jadwalka Koowaad	8
Jadwalka Labaad	11
Khidmadaha Shatiyada Kalluumaysiga	11
Qeybta 1: Khidmada Shatiyada Doonyaha Kalluumaysiga Maxalliga ah, Kuwa Qalaad iyo Kuwa la Wadaago	11
Qeybta 2aad. Khidmadaha Shatiyada Kalluumaysiga Maraakiibta wadaniga ah, Kuwa la Wadaago iyo kuwa qalaad	12
Qeybta 3aad. Ruqsadaha lio Shatiyada Kalluumaysiga ee Gaadiidka Taakulaynta iyo Kalluun Warshadeeyayaasha	13
XUSUUSIN	13

CUTUBKA 1AAD

MAGACA SHARCIGA IYO ERAY-BIXIN

Qodobka 1aad:

Eray bixin

Haddii aan nuxurka macnahu uusan si ka duwan u sheegin, erayadaan waxaa loola jeeda macnahaan:-

"Badda Galmudug" waxaa loola jeedaa dhul badeedka ilaa 12 Mayl marka xeebta laga bilaabo, qiyaastaas waxaa ay la xariirta heshiiska caalamiga ah ee qaramada midoobay ee sharciga badaha ku tilmaama, kaas oo soo baxay 10 kii December 1982 iyo aagga ku xiga ilaa 24 Mayl oo ku imaaday heshiis ay wada gaareen 10 Febaraayo 2018, dawlad-gobaleedyada xubnaha ka ah dawlada Faderaalka iyo Dawlada Faderaalkaa Soomaaliya, dhulkaas oo ay Dawlad Gobaleedka Galmudug ku leedahay awood ay ku maamusho.

"Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Kalluumaysiga Dawlad Gobaleedka Galmudug;

"Wasaarad" waxaa loola jeedaa Wasaarada Dekadaha iyo Kalluumaysiga Dawlad Gobaleedka Galmudug;

"Wax soo saar" waxaa loola jeedaa kheyraad badeed kasta oo lagu qabto qalab kalluumaysi ee sharciga kalluumaysiga Galmudug oggol yahay.

"Buugga diiwaanka" waxaa loola jeedaa diiwaan looga baahan yahay in uu saaran yahay gaadiidka haysta shati dushiisa, kaas oo lagu qoro dhammaan hawlaha kalluumaysi ee gaadiidkaas,

"Gaadiid la wadaago" waxaa loola jeedaa gaadiid kasta oo kalluumaysi oo ay wadaagaan muwaadiniin soomaali iyo ajaanib ah oo ay leedahay shirkad ka diiwaan gashan Dawladda Galmudug oo saamiga shirkada 50% ugu yaraan leeyihii dadka Soomaaliyeed,

"Gaadiid wadani ah" waxaa loola jeeda gaadiid kasta oo kalluumaysi oo sita calanka Soomaaliya, gabi ahaanna ay leedahay Dawladda Gobaleedka Galmudug ama cid (shirkad, jamciyad ama urur Soomaliyeed) laguna asaasay si waafaqsan sharciyadda u yaal Dawlad Gobaleedka Galmudug, ama uu leeyahay qof ama dad ka badan oo ah muwaadiniinta Jamhuuriyada Fadaraalka Somaaliya;

"Gaadiid qalaad" waxaa loola jeeda gaadiid kasta oo ka diiwaan gashan wadan shisheeye si waafaqsan sharciyada wadankaas; aana ahayn gaadiid la wadaago oo buuxiya shuruudaha kor lagu xusay;

"Guddiga farsamo ee shati bixinta" waxaa loola jeedaa guddi farsamo oo uu wasiirku ka magacaabayo saraakiisha iyo shaqaalaha wasaaradda, kuwaas oo farsmo ahaan uga talo siinaya hirgelinta sharcigan.

"Kala wareejin" waxaa loola jeedaa ka dejinta dhammaan ama qayb kamid ah kalluun saaran gaadiid laguna wareejiyo gaadiid kale oo ku sugaran badda ama dekadda.

"kalluun warshadeeye" waxaa loola jeedaa gaadiid kasta oo leh awood uu ku habeeyo, ku keydiyo, kuna geeyo kalluunka dekad loo cayimay;

"Maamule" waxaa loola jeedaa qof kasta oo horjooge ah, hawl geliya, agaasima ama xukuma gaadiid, ayna ku jiraan milkiiluhu, ijaartuhu, naakhuuduhu ama wakiilku;

"Qaboojiye" waxaa loola jeedaa gaadiid soo galay badda Galmudug oo leh awood qaboojin, ujeeddadiisuna tahay qaadista kalluun qabow oo loo wado meelo waddanka dibbaddiisa ah;

"Muddada shatiga" waxaa loola jeedaa muddada uu ansaxa yahay shati lagu bixiyay si waafaqsan Sharciga Kalluumaysiga Dawlad Goboleedka Galmudug;

"Qalabka dabagalka gaadiidka" waxaa loola jeedaa qalab la shaqeeya dayax gacmeedka oo lagu dhejiyo gaadiidka shatiga la siiyo shatiga kaas oo lagula socdo dhaqdhaaqiisa iyo hawl galkiisa kalluumaysiga;

"Safar kalluumaysi" waxaa loola jeeda waqtiga u dhaxeeya marka gaadiid kalluumaysi ka furto dekadda ilaa marka uu xeebta keeno ama gaadiid kale uu ku wareejiyo kalluunkii uu soo qabtay ilaa iyo intuu dekadda ka soo furtay;

"Shati/ruqsad" waxaa loola jeedaa ogolaanshaha la siiyo qofka ka hor intuusan bilaabin shaqo kalluumaysi ama shaqo la xiriirta kalluumaysi;

"Wakiil" waxaa loola jeedaa wakiil uu magacawday maamule gaadiid kalluumaysi ee qalaad ama la wadaago wasaaraddana ka diiwaan gashan kaas oo loo igmaday in uu matalo maamulaha, awoodna u leh sharcyan qaadashada mas'uuliyadaha isaga oo matalaya maamulaha;

Qodobka 2aad.

Magaca Sharciga

Sharciga Khidmadaha iyo Ujuurooyinka Kalluumaysiga badda Galmudug.

CUTUBKA

2AAD

KHIDMADAHA IYO UJUUROOYINKA

Qodobka 3aad.

Khidmado Shati

Waxaa jiraya khidmado si horumaris ah loo bixinayo kuwa oo la xiriira:

1. Shatiyada la siiyo gaadiidka kalluumaysiga maxaliga, kuwa la wadaago iyo kuwa qalaad sida ku qeexan jadwalka labaad ee Sharcigaan; khidmadahaan waxaa la qaadaa iyada oo la eegayo lahaanshaha, habka kalluumaysi iyo culayska (Gross Tonnage GT) ama Mugga Khanka Kalluunka (Fish Hold Capacity), hadba kii ku haboon.
2. Ruqsadaha la siiyo gaadiidka taakuleynta (Support Vessels), kuwa habeeya kalluunka (Fish Processing Vessels), kuwa sahayda (Supply Vessels), qaboojiyayaasha (Reefer Carriers), iyo saxiimadaha qalaad (foreign skiffs) u kalluumeeya gaadiid qalaad ama kuwa la wadaago sida ku qeexan jadwalka labaad ee Sharcigaan.
3. Codsiyada shatiyada kalluumaysiga.
4. Diiwaan galinta wakiilada wadaniga ah ee gaadiidka qalaad iyo kuwa la wadaago.

Qodobka 4aad.

Kharashyo iyo Kordhin (Charges) kale.

Waxaa jiraya kharashyo iyo kordhin kale oo si horumaris ah loo bixinayo sida ku qeexan Jadwalka labaad lana xiriira:

1. Rahmadda keenista Buuga Diiwaanka.

Qodobka 5aad.

Ujuurooyin.

1. Marka laga reebo khidmadda shatiga, waxa jiri doona ujuurooyin la qaadayo oo ah 10% wadarta qiimaha beeca koowaad ee wax soo saarka kalluunka iyo qolofleyda ee gaadiidka qalaad iyo kuwa la wadaago ee haysta shatiyo kana hawl-gala badda Galmudug, waxaana lagu jaangoynayaa qiimaha beeca koowaad ee sicirka suuqa ee markaas jira ee lagu daabaco Globefish /infoFish, InfoSamak, iwm, t) Guddiga Farsamo ee Shati Bixinta ayaa goynaya qiimaha beeca kowaad ee wax soo saarka iyaga oo ku jaangoynaya sicirka suuqa ee markaas jira ee lagu daabaco Globefish InfoFish, InfoSamak, iwm

2. Ujuuro lagama qaadayo wax soosaarka ay soo qabtaan gaadiidka wadaniga ah lagana iibiyo cid kale.
3. Marka ay habboon tahay in la qaado ujuuro, maamulaha gaadiidku waxa uu dhigayaa rahman taas oo xisaab ahaan saldhig lagu salaynayo qaadka khanka kaluunka ee gaadiidkaas una dhiganta tankiiba \$100.
4. Wixii is waafajin ah ee ku saabsan farqiga u dhaxeeya rahmandii ujuuro ahaan horey looga qadimay maamulaha iyo wax soo saarka dhabta ah ee gaadiidka, waxaa la samayn doonaa ka hor inta uusan gaadiidku ka bixin badda Galmudug ama marka ay dhammaato muddada shatigu ansax yahay, hadba kii soo hormara.

Qodobka 6aad.

Dakhliga Shatiyada iyo Ruqsadaha

- (1) Dhammaan khidmadaha, ujuurooyinka iyo Kordhinta kale ee waajibay waxaa lagu bixinayaa lacag adag oo sarrifkeedu caalami yahay sida uu dhigagayo sharciga Kalluumaysiga Galmudug qodobkiisa 21-aad.
- (2) Dhammaan ujuurooyinka, khidmadaha iyo kordhinta kale ee sharcigani waajibiyey waxa lagu qaadayaa nidaamka maaliyadeed ee Galmudug.

CUTUBKA 3AAD

SHATIYADA IYO RUQSADAHKA GAADIIDKA KALLUUMAYSIGA

Qodobka 7aad.

Codsiga Shatiyada Kalluumaysiga

Codsiga shatiyada gaadiidka kalluumaysiga waxaa loogu soo gudbinayaa Wasaaradda qoraal ahaan, waana in ay ku jiraan maclummaadka lagu xusay Jadwalka Koowaad ee sharcigaan.

Qodobka 8aad.

Awoodda bixinta shatiyada gaadiidka kalluumaysiga

- (1) Shatiyada kalluumaysiga ee gaadiidka la wadaago ama gaadiidka qalaad ee lagu bixiyay si waafaqsan Sharciga kalluumaysiga dawladda Gobaleedka Galmudug, waxaa kaliya oo bixin kara Wasiirka isaga oo la kaashanaya madaxda Wasaaradda iyo Guddiga farsamo ee shati bixinta.
- (2) Shatiyada kalluumaysi ee wadaniga ah ee lagu bixiyo si waafaqsan sharciga kalluumaysiga dawladda Gobaleedka Galmudug waxaa keliya oo bixin kara Agaasimaha guud ee Wasaaradda, sida uu qabo sharciga kalluumaysiga Dawlad

Gobaleedka Galmudug qeybta 4aad ee shati siinta gaadiidka kalluumaysi ee wadaniga ah, qodobka 15aad farqadiisa 2aad.

Qodobka 9aad.

Muddada ay Shatiyada Kalluumaysigu Ansaxa yihin

Shatiyada kalluumaysiga ee la siiyo gaadiidka wadaniga ah, kuwa la wadaago iyo kuwa qalaad, hadii aan lala laaban ama aan la joojin, waxa ay ansax ahaanayaan muddooyinka lagu cayimay Jadwalka labaad ee loo cayimay hababka kalluumaysi ee kala duwan.

Qodobka 10aad.

Tirada Safar Kalluumaysi ee la oggol yahay Muddada Shatigu Ansaxa yahay

Gaadiidka adeegsada jilbaha dejiska ah, shaayadaha, jeestada iyo sidoo kale gaadiidka iibsada kalluunka ee ka hawl gala badda Galmudug ee la siiyey shatiyada waxa ay samayn karaan hal safar kalluumaysi oo kaliya inta lagu gudo jiro muddooyinka loo jaangooyay shatiyadooda ee ku cayiman Jadwalka labaad.

Qodobka 11aad.

Ruqsadaha Gaadiidka Taakulaynta

Qofna kama shaqaysiin karo umana adeegsan karo gaadiidka taakulaynta hawlo kalluumaysiga la xiriira oo uu fuliyo gaadiid kalluumaysi oo qalaad ama mid la wadaago, iyada oo uusan horey u haysan ogolaansho qoraal ah oo uu bixiyay Wasiirku isla markaasna waafaqsan Sharciga kalluumaysiga Galmudug.

Qodobka 12aad.

Wakiilada Gaadiidka Kalluumaysiga Qalaad iyo Kuwa la Wadaago

Maamulayaasha gaadiidka daneeynaya in ay ka kalluumaystaan badda Galmudug waa in ay magacowdaan ayna leeyihiin wakiill wadani ah oo ka diiwaan gashan Wasaaradda, kaas oo awood u leh in uu ogaado ama ka jawaabo arrimaha sharchiyan khuseeya gaadiidkooda, iyada oo ay ku jirto maareynta gaadiidka marka uu joogo dekeda. Xiriir, xog, dukumiinti, codsi ama jawaab kasta oo ku socota ama ka imaanaysa wakiilkaas, waxaa loo tixgalinayaa in ay si buuxda u ogyihiin mulkiilayaashu iyo maamulayaasha gaadiidka.

Qodobka 13aad.

Shuruudaha Shatiyada Kalluumaysiga

Shatiyada kalluumaysi ee la siiyo gaadiidka maxaliga ah, kuwa qalaad iyo kuwa la wadaago, waxaa ay ku xiran yihiin shuruudaha ku lifaaqan shatiga. Ka baaqsashada in la fuliyo

shuruudahaasi waxaa ay horseedi doontaa joojinta ama baabi'inta shatiga iyo xayiraado dheraad ah oo la xiriira siinta shatiyo mustaqbalka looga hawlgalo badda Galmudug.

Qodobka 14aad.

Naakhuude ama Milkile

Naakhuude ama Mulkiile kasta oo gaadiid kalluumaysi ee ajnebi, la wadaago ama wadani ah haddii uu ku gefo sharcigaan waxaa loo raacayaan ganaaxa ku xusan Sharciga Kalluumaysiga Galmudug.

Qodobka 15aad.

Dhaqangalka Sharciga

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka uu Golaha Baarlamaanka Galmudug ansixiyo, Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudugna saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

LIFAAQYADA JADWALADA

KHIDMOOYINKA IYO UJUUROOYINKA KALLUUMAYSIGA BADDAGALMUDUG

JADWALKA 1AAD

Codsiga Shatiyada Kalluumaysiga Gaadiidka Maxaliga, Kuwa la wadaago iyo kuwa Qalaad

Ku: Wasaarada Dekadaha iyo Kalluumaysga, Dawlada Galmudug ee Soomaaliya.

Aniga oo ah qofka hoos ku saxiixan waxaan halkaan ku codsanayaa shati kalluumaysi si aan uga kalluumaysto badda Dawlad Gobaleedka Galmudug.

1. Magaca Milkiilaha.....
2. Cinwaanka milkiilaha.....
3. Magaca wakiilka Maxaliga ah ee Galmudug.....
4. Cinwaanka wakiilka Maxaliga ah ee Galmudug.....
5. Magaca gaadiidka.....
6. Nooca gaadiidka.....
7. Dekedda uu ka diiwaan gashanyahay.....
8. Calanka uu sito.....
9. Lambarka diiwaangelinta.....
10. Lambarka IMO.....
11. Meesha iyo sanadka la sameeyay.....
12. Samayska qalfoofka.....
13. Dhererka guud ee gaadiidka.....
14. Guud ahaan balaca gaadiidka.....
15. Dhererka dhinaca iyo dekhelka (Moulded depth and beam)
16. Tanka guud ee gaadiidka.....
17. Tanka saafiga ah ee gaadiidka.....
18. Matoorka wayn iyo kheylka (HP).....
19. Qaadka khanka.....
20. Tanka uu qaadi karo.....
 - b. Nooca qaboojiyaha, awooddiisa, lambarka.....
 - t. Tanka khanka kalluunka.....
21. Shaqaalah markabka (liiska magacyadooda, dhalashadooda, Baasaboorradooda...)
22. Saldhigga shaqo (dekeddiisa).....
23. Tilmaamaha gaadiidka.....
24. Calaamadda wicidda raadiyaha ee caalarniga ah.....
25. Mowjadda.....
26. Nooca iyo lambarrada isgaarsiinta gaadiidka.....
27. Nooca hawl galka kalluumaysiga.....
28. Sifaha qalabka kalluumaysiga!.....
 - b. Noocyada.....

- t. Tilmaamaha qalabka kalluumaysiga.....
 - j. Tirada.....
29. Noocyada kalluun ee la rabo in la qabsado.....
30. Mudada shatiga la codsanayo.....
31. Waqtiga la bilaabayo hawl-galka kalluumaysiga.....
32. Hadii ay horay Galmudug kuu siisay shati, sheeg lambarka shatiga aad haysto.....
33. Faahfaahinta shati kalluumaysi oo shaqaynaya oo ay bixisay dawlad kale:
 - a. Wadanka shatiga bixiyay.....
 - b. Foomka iyo lambarka.....
 - c. Mudada uu ansaxa yahay.....
 - d. Aagag gaar ah.....
 - e. Noocyada kalluunka ee loo oggol yahay.....
34. Faahfaahinta qalabka isgaarsiinta iyo elektooronikada ah ee saaran gaadiidka:
 - a. Radiyoow.....
 - b. Auto Pilot.....
 - c. Echo sounder.....
 - d. Sonar.....
 - e. Lonar.....
 - f. Radar.....
 - g. Direction finder.....
 - h. Decca navigator.....
 - i. Type of vessel monitoring system installed.....
 - j. Satellite phone.....
 - k. Wixii kale (sheeg).....
35. Ku lifaaq sawirka ugu danbeeyay ee gaadiidka oo muujinayo dharnaan calaamadaha loo baahanyahay.
36. Sheeg hadii uu mulkiilahu ama shirkaddu uu/ay musallifay ama ay ku socoto waddan kale maxakamdayn ee la xiriirta musallifnimo.....
37. Sheeg hadii mulkiilaha, maamulaha ama gaadiidku ku lug-lahaayeen jabinta sharciyada dowlada Galmudug ee Soomaaliya.
38. Gaadiidkaan kor lagu soo qeexay inta uu magacaan iyo calankaan watay, ama intuu watey magacyo ama calammo kuwa uu hadda wato ka horreeyey, ma la gala laabtay ama laga joojiyey ruqsad ama shati saddexdii sano ee danbeeyey?

HAA MAYA

Hadii ay jawaabtaadu haa tahay, ku soo lifaaq halkaan warqad gaar ah oo aad ku soo taxayso duruufaha ku xeeran xaaland kasta, kuna dar sharaxaad ku saabsan xaaladdii joojintii ama kala laabashadii shatigu hadda halka ay marayso.

Caddayn

Waxaan cadaynayaa tilmaamaha kor ku xusan in ay yihiin kuwo sax ah, waxaana ballan qaadayaa in aan u hogransamo qodobbada Sharciyada Kalluumaysiga Galmudug iyo

Soomaaliya; amarrada saraakiisha Wasaaradda iyo hey'adaha nabadgelyada, socdaalka, caafimaadka, dab demiska, canshuuraha, iwm.

Magaca codsadaha.....

Cadee hadii aad mulkiile, Maamule ama wakiil tahay.....

Saxiixa codsadaha.....

Tariikhda.....

Digniin

Shati kasta oo lagu bixiyay macluumaadka ku qoran foomka codsigaan waa la tirtirayaahaddii macluumaadku noqdo mid aan sax ahayn

Dukumiintiyo dheeraad ah oo lala soo gudbinayo Foomka codsigaan:

- (1) Nuql shahaadada (calanka) diwaangalinta gaadiidka
- (2) Nuql shahaadada isbakhshinka doonta badbaadada iyo qalabka lagu dejijo (Life Raft & Hydrostatic Release Gear) oo aan dhicin
- (3) Nuql shahaadada isbakhtinta dab demiska gacanta lagu qaato,
- (4) Nuql shahaadada caymiska qalfoofka (hull);
- (5) Nuql shahaadada shatiga raadiyaha oo aan dhicin;
- (6) Liis buuxa oo muujinya magacyada, dhalashada, iyo baasboorrada shaqaalahagaadiidka;
- (7) Foomka diiwaan gelinta qalabka dabagalka gaadiidka (Vessel Monitoring System) oo la soo buuxiyey,

JADWALKA **2AAD**
KHIDMADAHA SHATIYADA KALLUUMAYSIGA

Qeybta 1aad:

**Khidmada Shatiyada Doonyaha Kalluumaysiga
 Maxalliga, Kuwa Qalaad iyo Kuwa la Wadaago**

S/N	Nooca Gaadiidka	Habka Kalluumaysiga	Tanka	Gaadiid Wadaniga ah	Gaadiid Ia Wadaago	Gaadiid Qalaad	Muddada Shatiga
1	Doonyaha Nuuca Yemeniyiinta	Shabaagaha Jiidmada	Qaadka Khanka Kallunka (Qkk)	US\$100/ton	US\$200/ton	US\$300/ton	45 rnaalmood
		Shaayadaha		US \$ 100/ton	US\$200/ton	US\$300/ton	45 maalmood
		Jilbaha dejiska		US\$100/ton	US\$200/ton	US\$500/ton	45 maalmood
2	Doonyaha Nooca Iraaniyiinta	Shabaagaha Jiidmada	≥75 tons (QKK)	\$100/tonn	US\$300/ton	US\$400/ton	45 maalmood
3	Doonyaha Istilaamka/gad anaya	Gadanaya Kalluun	≤50 tons (QKK)	US\$30/ton	US\$50/ton	US\$100/ton	45 maalmood
4	Doonyaha Istilaamka	Gadanaya Kaljuun	≥ 51 tons (QKK)	US\$40/ton	US\$60/ton	US\$ 1 50/ton	45 maalmood

XUSUUSIN:

Khidmada shatiyada kalluumaysiga ee doonyaha adeegsada shabaagta jiidmada, shaayadda iyo jilbaha dejiska, iyo gaadiidka istilaamka ah waxaa lagu salaynayaa xisaab ahaan qaadka khankooda waxaana lagu dhufanaya tankiiba sida lagu muujiyey shaxdaan kore.

Qeybta 2aad.

Khidmadaha Shatiyada Kalluumaysiga Maraakiibta wadaniga ah,
Kuwa la Wadaago iyo kuwa qalaad.

S/n	Nooca Markabka	Habka Kallumaysi	Tanka	Gaadiid wadaniga ah	Gaadiid la Wadaago	Gaadiid Qalaad	Mudada Shatiga
1	Maraakiibta adeegsada jeestada	Jeesto	< 300 Qaadka khanka	US\$15000	US\$20,000	US\$25,000	3 Bilood
			351-550 GT	US\$20,000	US\$30,000	US\$30,000	3 Bilood
			551-750 GT	US\$20,000	US\$30,000	US\$30,000	3 Blood
			>751 GT	US\$25,000	US\$35,000	US\$40,000	3 Bilood

XUSUUSIN:

Khidmada shatiyada kalluumaysiga ee maraakiibta adeegsada jeestada waxaa lagu salaynayaa xisaab ahaan tankooda guud waxaana laga qaadayaa qiime duuduub ah oo seddex biloodle ah sida lagu muujiyey shaxdaan kore

Qeybta 3aad.

Ruqsadaha iyo Shatiyada Kalluumaysiga ee Gaadiidka Taakulaynta iyo Kalluun Warshadeeye-yaasha

S/n	Nooca gaadiidka	Habka kalluumaysi	Tanka	Gaadiid wadaniga ah	Gaadiid la wadaago	Gaadiidka Qalaad	Muddada shatiga
1	Kalluun warshadeye	Ku jilabanaya qalabkiisa sida shabaago, gargoorro, iwm		US\$100/ton	US\$300/ton	US\$600/ton	30 maalmod
2	Kalluun warshadeye	Habaynaya kalluun gaadiid kale watay		US\$5,000	US\$10,000	US\$25,000	3 Bilood
3	Markabka sahayda	Sahay qaybin		US\$1,000	US\$2,000	US\$6,000	3 Bilood
4	Markab qaboojiye ah	Kala wareegaya kalluun markab kale		US\$1,000	US\$2,000	US\$3,000	Safar walba

XUSUUSIN:

- (1) Khidmada shatiyada kalluumaysiga ee kalluun warshadeeyayaasha u shaqaynaya sida istilaamka kuna jilaabanaya qalab kalluumaysi oo iyagu leeyihiin sida saxiimado, gar-goorro, shabaago, iwm waxaa lagu salaynayaa xisaab ahaan qaadka khankooda waxaana lagu dhufanayaa tan walba sida lagu muujiyey shaxdaan kore.
- (2) Khidmada shatiyada kalluumaysiga ee kalluun warshadeeyayaasha habaynaya kalluun ay u keeneen gaadiidka wadaniga ah, kuwa la wadaago arna kuwa qalaad waxaa lagu salaynayaa xisaab ahaan qiime duuduub ah oo seddex biloodle ah sida lagu muujiyey shaxdaan kore.
- (3) Khidmada ruqsadaha maraakiibta taakulaynta waxaa lagu salaynayaa xisaab ahaan qiime duuduub ah oo seddex biloodle ah sida lagu muujiyey shaxdaan kore.

Qeybta 4aad:

Kharashyo iyo Kordhin (Charges) Kale

- (1) Khidmada codsiga shatiga: US\$20/codsigiiba
- (2) Diiwaan gelinta wakiillada wadaniga ah: US\$3,000/sannadkiiba
- (3) Khidmada rahmarda buugga diiwaanka: US\$1,000

XUSUUSIN

- (1) Khidmada ku xusan Qeybta 4aad ee Jadwalka 2aad ee Sharcigaan waa dakhli hoosaad u xaroonaya Wasaaradda.
- (2) Rahmadda buuggaa diiwaanka ee horey loo qaddimay, dib ayaa loogu celinayaa ka dib marka si munaasib ah loo soo buuxsho isla markaasna loo keeno Wasaaradda Buugga Diiwaanka iyo macluumaadka VMS. Visal Moniyorung system.